

# Warqada Macluumaadka ee COVID-19

Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxay cusbooneysiisay warqadan May 27, 2020. DCYF waxay sii wadi doontaa cusbooneysiinta dukumentigan marka loo baahdo. Macluumaad dheeriya booqo [dcyf.wa.gov](http://dcyf.wa.gov).

Si loo joojiyo fiditaanka fayraska COVID-19, DCYF waxay xidhay hoolashada dadweynaha ee dhamaan dhismayaashayada mana sameynayso ganacsiyada gaarka ah.

## Qalabka Badbaadada Shakhsiga(PPE)

- Tani waxa ku jira golofisyada, maaskarada, go'yaasha, buudhadhka iyo marooyinka wajiga.
- DCYF waxay heshay PPE waxayna siinaysaa 24/7 xarumaha iyo shaqaalaha khatarta ugu jira fayras COVID-19. Waxaanu ognahay in PPE badan loo baahan yahay, waxaananu isku dayeynaa inaan helno in badan.

## Barnaamijyada Taageerada Qoyska

### Booqashada Guriga

- Maarij, DCYF waxay weydiisatay bixiyayaasha booqashooyinka guryuhu in ay joojiyaan booqashooyinka gaarka ah oo ay siiyaan booqashooyin muuqaal iyo tilifoon ah taas badelkeeda. Booqashooyinka aan tooska ahyn waxay sii socon doonaan ilaa Juun 30. Qaar ka mida bixiyayaasha booqashooyinka ayaa isticmaalaya booqashooyin ku saleysan uuqaal ama weybsaayd iyo tilifoon, iimayl ama qoraal. Adeeg bixiyayaasha qaar uga tuuraya qalabka qoysaska, masafo badqab ah.
- DCYF waxay weydiisatay barnaamijka lacag siinta ee Home Visiting Service Account (HVSA) in ay joojiyaan booqashooyinka gaarka ah ilaa Juun 30.
  - Inta lagu jiro wakhtigani, DCYF waxay bixin doontaa dhamaan kharashaadka akoonada, xataa hadii dhamaan shuruudaha aan la buuxin.

### Early Support for Infants and Toddlers (ESIT)

- Adeeg bixiyayaasha koobaad waxay isticmaalayaan wicitaano tilifoon iyo muuqaala ilaa Juun 30, sidaasi darteed booqashooyinku waxay u sii socon doonaa si badqabta caruurta iyo adeeg bixiyayaasha dhexdooda.

## Daryeelka Caruurta

### Khadka Qabashada

- DCYF waxay sii wada in ay ku shaqeyso bilaash 24/7 khadka xadgudubka iyo dayacaada 1-866-363-4276.



## Booqashooyinka

- DCYF waxay sii wadaysaa booqashooyinka gaarka ah lakiin inta lagu jiro xanuunka COVID-19, booqashooyinka waxa laga bixin doonaa isku darka booqashooyinka aan tooska ahayn iyo kuwa gaarka ah.
- Si loo hubiyo badqabka caruurta, DCYF waxay sii wadaysaa in ay baadho xadgudubka caruurta ama warbixinaha dayacaada gaarka ah.
- DCYF waxay weydiisay in adeeg bixiyayaashu raacaan hagitaanada caafimaadka iyo baratakooladaDOH si loo sameeyo booqashooyin badqaba intii macquul u ah dhamaan ka qeybqaatayaasha.

## Liisanka Daryeelka Caruurta

- DCYF waxay abuurta daryeel caruureed oo xaaladaha degdega ah iyo nidaam cudurdaar si loo taageero barnaamijyada iyo qoysaska.
  - Haddii aanay buuxin karin shuruudaha Xeerka Maamulka Washington inta lagu jiro COVID-19, adeeg bixiyayaasha daryeelka caruurta waxay u baahan yihiin in ay la xiriiraan liisan bixiyahooda gobolka si ay ugala hadlaan khiyaarada banaan.
  - Wac 1-888-543-7414 si aad wax badan uga ogaatid noqoshada waalid daryeela caruurta.
- DCYF waxay weydiisatay dhamaan adeeg bixiyayaasha in ay kala fogaansha sameeyaan, siday dhigayso DOH iyo Amarka Badhasaabku.

## Baadhitaanada Guud

DCYF waxay wax ka badan ku sameysay baadhitaanada guud ee daryeelka caruurta iyo barnaamijyada waxbarashada si hoos loogu dhigo wakhtiyada kama danbeysta ah, si badqabta looga saaro xanibaadaha loona qiimeeyo dadka siin kara daryeelka caruurta.

## Daryeelka Caruurta

- Xarumaha daryeelka caruurta iyo adeeg bixiyayaasha qoysku ma galin karaan in ka badan 10 qof qolkiiba, oo ay ku jiraan caruurta iyo dadka waaweyn. Haddii xaruni leedahay isbayska ay ku deegsiin karto in ka badan hal koox, way sameyn kartaa sidaasi.
- Jawaab bixiyayaasha koobaad iyo shaqaalaha asaasiga ah waxay u baahan yihiin daryeel caruureed (kalkaalisoooyinka, dhakhaatiirta, sharci dhaqan galinta, dabdamiska, bukaan caawiyayaasha iyo shaqaalaha bulshada). DCYF waxay kula talinaysaa adeeg bixiyayaasha in ay ugu adeegaan qoysaska liiska muhiimka iyo caruurta ugu jilicdasan iyadoo lagu saleynayo baahiyaha bulshada.
- DCYF waxay caawino siinaysaa daryeelayaasha caruurta hoos yimaada CARES Act. Adeeg bixiyayaashu waxay ka codsan karaan lacagta caawimada Juun 30 ama ilaa lacagta ay dhamaato [wacompass.force.com/PP\\_LoginPage](https://wacompass.force.com/PP_LoginPage).



## Kabka Daryeelka Caruurta

- DCYF waxay badaleysaa shuruucda dhaqdhaqaaqyada si qoysasku u heli karaan daryeel caruureed inta lagu jiro wakhtigan.
  - Qoysasku waa in ay dib u fasaxaan daryeelka 12 bilood oo kasta waxaana jira shuruudo ku haboonaansho. DCYF waxay fududaynaysaa shuruucda si qoysasku ugu haboonaan karaan.
  - Qoysasku waxay u baahan yihiin in ay dib u codsadaan marka looga baahdo oo ay soo sheegaan xaaladahooda iyo dhaqdhaqaaqadooda.
  - Waxaanu ku boorinaynaa qoysasku in ay dib u codsadaan si ay u ilaaliyaan ku haboonaanshaha si ay u helaan karaan daryeelka caruurta marka loo baahdo.
  - DCYF waxay ka dhaafaysaa lacag bixinta Abril, May iyo Juun qoysaska helaya Working Connections Child Care. DCYF waxay siin doontaa adeeg bixiyayaasha xadi dhameystiran, oo ay ku jiraan heerka ugu wanaagsan iyo lacagta uu qoysku bixin lahaa.

## Ku Geelaystayaasha Kaqeybqaatayaasha Koobaad

- Adeeg bixiyayaasha ka qeybqaata Ku Guuleystayaasha Koobaad waxay sii heli doonaan biladaha horumarinta tayada heerarka dib u bixinta lacagta ee lagusoo lifaaqay diwaangalintooda. Badhasaab Inslee wuxuu ka dhaafay sharciyada la xidhiidha Ku Guuleystayaasha Koobaad wakhtiyada iyo shuruudaha aan saameynayn lacag bixintan.

## Juvenile Rehabilitation (JR)

- DCYF waxay ku badashay booqashooyinkii gaarka ahaa booqashooyin muuqaalo ah.
- Dhamaan shaqaalaha iyo ganacsatad galaya 24/7 xarumuhu waa in laga baadhaa astaamaha COVID-19.
- Ka hor galitaanka dhismaha JR, shaqaalaha, ganacsatada iyo qandaraaslayaasha waxa la weydiinayaa hadii ay la xidhiidheen qof leh astaamo muuqda.
- Dhamaan shaqaalaha, dadka degan goobta iyo qandaraaslayaashu waa in ay maydhaan gacmahooda markay galaan xarumaha.
- Waxaanu si joogto ah u nadiifin doonaa xarumaha, gaar ahaan meelaha aadka loo taabto.
- Dhamaan dadka degan waa in ay u ogeysiyaan shaqaalaha si degdega ah hadii aanay dareemayn caafimaad.
- Hadii qof aanu dareemayn caafimaad, shaqaaluhu waxay ula xidhiidhi doonaan daryeel bixiye caafimaad si dhakhso ah waxayna ogeysiin doonaan qoyska.

## La xiriir

Ka booqo halka lanagala soo xiriirayo weybsaaydka DCYF website ama la xiriir **[dcyf.covid-19@dcyf.wa.gov](mailto:dcyf.covid-19@dcyf.wa.gov)** wixii su'aalo ah.

If you would like copies of this document in an alternative format or language, please contact DCYF Constituent Relations (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **[ConstRelations@dcyf.wa.gov](mailto:ConstRelations@dcyf.wa.gov)**).

DCYF PUBLICATION COMM\_0078 (05-29-2020) SOMALI (Af-Soomaali) – SO



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**